

Adeegyada Medicaid ee Gaadiidka iyo Meesha la Dego

Loogu talagalay qoysaska Washington ee Medicaid loo oggolaaday

Haddii qoyskaaga loo oggolaaday in Medicaid uu kharashkiisa daboolo aanad gargaar u baahan tihiin si aad u tagtaan ballan caafimaadeed oo/ama aad u heshaan meel aad degtaan, “dillaalka” (broker) ee Medicaid ayaa ku caawin kara.

Barnaamijka Medicaid waxuu qandaraas la leeyahay adeeg bixiyeyaasha bulshada ee la yiraahdo dillaallo. Dillaalladu waxay kaa caawin karaan in aad diyaarsato safar aad ku tagto ballanta caafimaadeed ee ilmahaaga, haddiina aad u baahato, waxay kaa caawin karaan in aad hesho meel aad Seattle ka degto.

Sideen dillaalkayga u helaa?

Toos ayaad dillaalkaaga ula xiriiri kartaa. Dillaalka waxaa qoyskaaga loogu xilsaaraa degmada aad deggan tahay. **Fiiri liiska ku yaalla bogga labaad.** Adeeggan waxaa loogu talagalay dhammaan degmooyinka Washington ku yaalla waxaana loogu talagalay ballamaha caafimaadeed ee ka diyaar ah degmada aad deggan tahay gudaheeda ama dibaddeeda.

Dillaalkaaga la hadal si aad u ogaato inta ballantaada ka hor aad u baahan tahay in aad adeegyada codsato iyo adeegyada aad u qalanto. Xafiisyada dhammaantood waxay kuu heli karaan turjumaanno telefoonka kugu caawiya.

Sideen safar u diyaarsadaa?

Waxaa laga yaabaa in aad u qalanto safarrada tagsiga, tigidhada baska ama fowsharrada shidaalka gaariga, taasoo ku xiran halka aad deggan tahay. Si aad safarka tagsiga u diyaarsato ama si aad macluumaad dheeraad ah u hesho, dillaalka Medicaid ee degmadaada la xiriir ugu yaraan 5 maalmood oo shaqo ballantaada ka hor.

Wixii khuseeya meesha aad degayso, waxaa laga yaabaa in aad u qalanto in aad:

- Isbitaalka degto. Hal waalid ayaa caadi ahaan degi kara sariirta agteeda.
- Degto guriga Ronald McDonald House (RMH) ee isbitaalka u dhow adigoo lacag yar ka bixinaya haddii qolal diyaar ka yihiin, haddii aad ku nooshahay meel in ka badan 45 mayl isbitaalka u jirta iyo haddii aad u baahan tahay in aad joogto ugu yaraan 4 habeen. Wac lambarka 206-838-0610 si aad isku qorto liiska sugayaasha.
- Degto huteel yar ama huteel caadi ah oo xaafadda ku yaalla oo uu kuu diyaariyo dillaalkaaga Medicaid (qofkaas la xiriir ugu yaraan 5 maalmood ka hor) haddii guriga RMH uu buuxo ama haddii aadan u qalmin in aad halkaas degto.

Sideen gargaar uga helaa bixinta lacagaha guriga Ronald McDonald House?

Barnaamijka Medicaid ayaa laga yaabaa in uu kaa caawiyo in aad iska bixiso lacagaha meesha aad ka degayso guriga RMH. Waa in qoyskaagu raaco tallaabooyinkan si aad gargaarka u heshaan:

1. Seattle Children's ka soo qaado warqad lagu xaqiijinayo ballantaada caafimaadeed iyo baahida aad u qabto meel aad degto. Barnaamijka Medicaid ayaa warqaddan u baahan doona. La xiriir hawlwadeenkaaga bulsheed (social worker) ee isbitaalka ama Adeegyada Martida (Guest Services) oo aad ka helayso lambarka 206-987-9330 ugu yaraan hal toddobaad ka hor inta aadan imanin si aad u codsato warqadda meesha la dego (lodging letter). Warqadda meesha la dego waxaa fakis loogu diri
2. doonaa dillaalka Medicaid si uu hawsha u bilaabo.
3. Dillaalkaaga Medicaid la xiriir si aad u codsato gargaarka meesha la dego oo aad u buuxiso baarista qaadashada.
4. Ilaa 2 toddobaad ka hor inta aadan Children's imanin, guriga RMH ka wac lambarka 206-838-0610 si aad u buuxiso baarista qaadashada oo laguugu daro liiska sugayaasha. Tani kama dhigna in qol laguugu ballanqaadayo.
5. 1 maalin ka hor inta aadan isbitaalka imanin, shaqaalaha guriga RMH ayaa kula soo xiriiri doona si ay kuu ogaysiiyaan haddii qol diyaar kuu yahay. Marka aad maalinta Isniinta imanayso, waxay kula soo xiriiri doonaan Axadda.

Adeegyada Gaadiidka iyo Meesha la dego ee Medicaid

Liiska dillaallada gaadiidka iyo meesha la dego ee degmo kaste

County	Broker	Phone	FAX
Adams	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Asotin	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Benton	People for People	509-248-6793 1-800-233-1624	509-574-5085
Chelan	People for People	509-248-6793 1-800-233-1624	509-574-5085
Clallam	Paratransit	360-377-7007 1-800-756-5438	360-377-1528
Clark	Human Services Council	360-694-9997 1-800-752-9422 Option 2	360-694-1446
Columbia	People for People	509-248-6793 1-800-233-1624	509-574-5085
Cowlitz	Human Services Council	360-694-9997 1-800-752-9422 Option 2	360-694-1446
Douglas	People for People	509-248-6793 1-800-233-1624	509-574-5085
Ferry	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Franklin	People for People	509-248-6793 1-800-233-1624	509-574-5085
Garfield	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Grant	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Grays Harbor	Paratransit	360-377-7007 1-800-846-5438	360-377-1528
Island	Northwest Regional Council	1-800-860-6812	360-734-5476
Jefferson	Paratransit	360-377-7007 1-800-756-5438	360-377-1528
King	Hopelink	1-800-923-7433	425-644-9447
Kitsap	Paratransit	360-377-7007 1-800-756-5438	360-377-1528
Kittitas	People for People	509-248-6793 1-800-233-1624	509-574-5085
Klickitat	Human Services Council	360-694-9997 1-800-752-9422 Option 2	360-694-1446
Lewis	Paratransit	360-377-7007 1-800-846-5438	360-377-1528
Lincoln	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Mason	Paratransit	360-377-7007 1-800-846-5438	360-377-1528
Okanogan	People for People	509-248-6793 1-800-233-1624	509-574-5085
Pacific	Paratransit	360-377-7007 1-800-846-5438	360-377-1528
Pend Oreille	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Pierce	Paratransit	360-377-7007 1-800-925-5438	360-377-1528
San Juan	Northwest Regional Council	1-800-860-6812	360-734-5476
Skagit	Northwest Regional Council	1-800-860-6812	360-734-5476
Skamania	Human Services Council	360-694-9997 1-800-752-9422 Option 2	360-694-1446
Snohomish	Hopelink	1-855-766-7433	425-644-9447
Spokane	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Stevens	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Thurston	Paratransit	360-377-7007 1-800-846-5438	360-377-1528
Wahkiakum	Human Services Council	360-694-9997 1-800-752-9422 Option 2	360-694-1446
Walla Walla	People for People	509-248-6793 1-800-233-1624	509-574-5085
Whatcom	Northwest Regional Council	360-738-4554 1-800-860-6812	360-734-5476
Whitman	Special Mobility Services	509-534-9760 1-800-892-4817	509-534-6980 1-888-829-9915
Yakima	People for People	509-248-6793 1-800-233-1624	509-574-5085

Seattle Children's ayaa ku siisa lacag la'aan adeegyada tarjumaadda bukaannada Maqalka beelay, maqalku ku adag yahay ama kuwa aan ku hadlin Ingiriisiga, xubnaha qoyska iyo wakiillada sharciyeed. Seattle Children ayaa macluumaadkan ka dhigi doonta in lagu helo qaab kale marka la weyddiisto. Uga soo wac Xarunta Ilaaha Qoyska 206-987-2201.

© 2017 Seattle Children's, Seattle, Washington. Dhammaan xuquuq dhowran.

7/17
PE539SO